
# JAMUURIYADA DIMOQRAADIGA FEDERAALKA ITOOBIYA



## SIYAASADA QARAN EE CARUURTA

**Masiya/2009**
**Adhis Ababa**

# Tusmo

Hordhac ........ 5
Qaybta koobaad ........ 7
1. Xalaada Guud ee Caruurta Itoobiya Iyo Ahmiyada ay Leedahay Siyaasada Qaran ee Caruurta 7
1.1. Xalaada Guud ee Caruurta Itoobiya ........ 7
1.1.1. Xalaada Arrimaha Dadwaynaha ........ 7
1.1. 2. Xalaada arrimaha caafimaadka ........ 7
1.1.3. Xalaada Waxbarashada ........ 8
1.1.4. Arrimaha ka qaybgalka caruurta ........ 11
1.1. 5. Caruurta oo loo Abuuro Qoys iyo Bi'ad ku Haboon Kooriinkooda ........ 12
1.1.6. Caruurta ay Haysato Duruufo adag oo Nolooleed ........ 14
1.1.7. Caadeeysiga iyo ku dhaqanka Caadooyinka Xun-Xun ........ 15
1.1.8. Diwaan Galinta Marxalaadaha Caruurta ........ 16
1.1.9. Kobcinta Wacyiga Bulshada ee ku Aadan Ilaalinta Xuquuqaha Caruurta ........ 17
1.1.10. Iskaashiga iyo Wada Shaqeeynta ........ 17
1.2. Ahmiyada siyaasadani ........ 18
Qaybta labaada ........ 20
2. Himilada, Ujeedooyinka Iyo Mab'adiida Siyaasada ........ 20
2.1. Himilada Siyaasada ........ 20
2.2. Ujeedooyinka Siyaasada ........ 20
2.2.1. Ujeedooyinka Guud ........ 20
2.2.2. Ujeedooyinka Faah-faahsan ........ 20
2.3. Mab'adiida Siyaasada ........ 21
2.3.1. Xaqa Noolasha, Badbaadada Iyo Barbaarinta suuban ee Caruurta ........ 21
2.3.2. Mudnaansiinta Danaha iyo Fayoqabka Caruurta ........ 21
2.3.3. Ka Madaxbanaanida Eex iyo Takoor ........ 21
2.3.4. Ka Qaybgalka Caruurta. ........ 21
Qaybta Sadexaad ........ 23
3. Arrimaha Ugu Waawayn ee Siyaasada ........ 23
3.1. Ilaalinta Xuquuqaha Madaaniga ah Iyo Xooriyada Caruurta ........ 23
3.2. Caruurta Iyo Daryeelka Qoyska ........ 23

3.3. Caruurta Iyo Caafimaadka ........ 24
3.4 Caruurta Iyo Waxbarashada ........ 25
3,5. Caruurta, dhaqanka, sugaanta iyo madadaalada ........ 26
3.6. Caruurta ay Haysato Duruufo adag oo Nolooleed ........ 27
3.7. Caruurta Iyo Bi'ada ........ 29
3.8. Xadgudbyada Caruurta, Ka Ganacsiga Caruurta, Ku Xoogsiga Caruurta Iyo Caadooyinka xun ee Waxyeelada leh ........ 30
Qaybta Afraad ........ 31
4. Xeeladaha Hirgalinta Siyaasada ........ 31
4.1. ku lamaaneynta arrimaha caruurta ........ 31
4.2. Taabogalinta Barnaamijyo Wacyigalin Iyo Abaabul ........ 31
4.3. Dhismaha Iskaashi, Isku Xidhnaan iyo Istaageersi ........ 32
4.4. Kor u qadiida ka qaybgalka caruurta ........ 32
4.5. Kor U Qadiida Ka Qaybgalka Qaab-Dhismeedyada Mujtaamaca ........ 33
4.6. Adkaynta Iyo Xoojinta Qoyska ........ 34
4.7. Taabogalinta Daraasado iyo Cilmi-Baadhis ........ 34
4.8. Fulinta Dib U Habeeyn Sharci ........ 35
4.9. Taabogalinta Nidaamka Xog Wadaaga ........ 35
4.10. Kobcinta Awooda Fulineed ........ 35
4.11. Taabogalinta Nidaamka Uruurinta Iyo Abaabulka Khayraadka ........ 36
4. 12. Asaasida Iyo adkaynta Qaab-Dhismeedyada ........ 36
Qaybta Shanaad ........ 38
5. Wajibaadka Iyo Doorka Kaga Aadan Laamaha Ay Khuseeyso Ilaalinta Xuquuqaha Iyo Fayaqabka Caruurta ........ 38
5. 1. Hay'addaha Dawliga ........ 38
5.2. Qaybaha gaarka loo leeyahay ........ 38
5.3. Qaab-dhismeedyada mujtaamaca ........ 39
5.4. Qoyska ........ 40
5.5. Hay'addaha Diimaha ........ 40
5. 6. Uruurada Iyo Hay'addaha Samafalka ........ 41
5. 7. Bahwadaagta Qaraadeed Iyo Calaamiga ee Horumarinta ........ 41
5.8. Doorka Caruurta ........ 41

Qaybta Lixaad ........................................................................................................................ 43
6. Nidaamka Dabagalka Iyo Qiimaynta Siyaasaada .................................................................... 43

## Hordhac

Sida ay tilmamayso sadaasha qiyaasta tirada dadka ee Wakaalada tirakoobka ee dalku soo saartay sanadkii 2007, tirada dadwaynaha Itoobiya waxaa lagu qiyaasay 94,352,139. Ayaa hab wafaaqsan shuruucda dalka iyo heeshiisyada calaamiga ee Itoobiya qaybta ka tahay waxay caruur u aqoonsadeen ilmo kasta oo da'diisu ka hooseeyso 18 sano jir oo tirada guud ee dadwaynaha ka noqonaysa 47,837,094 caruur, taasi oo u dhiganta boqolkiiba 52 iyadoo tiradani boqolkiiba 51 oo u dhigaanta 24,262,445 ay yihiin wiilal/lab halka boqolkiiba 49 oo u dhigaanta 23,574,649 ay ka yihiin gabdho ama dhideg. Marka arrintani laga eego dhinacyada degaanka ama dhulka ay ku kala nool yihiin ayay kuwa miyiga noqonayan 39,634,784 oo u dhigaanta boqolkiiba 82 halka kuwa magaalooyinkuna yihiin 8,129,736 oo u dhigaanta boqolkiiba 18.

Dhismaha nidaamka dimoqraadiyadeed iyo maamulka suuban ee ka haanaqaday Itoobiya madaama u baal cusub u furay dajiyey iyo dhaqangalinta siyaasado iyo shuruuc xal waara horseedaya oo xaqiijinaya horumarka xawliya iyo ka fa'iidaysiga dhamaan qaybaha bulsho oo dhan awgeed, dalkeenu wuxuu ku talaabsaday oo u qaday tuubta iyo geediga horumar xawliya oo aan kala go' lahayn. Gaar ahaan marka laga eego dhinacyada xaqiijinta xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta oo ah jiilka barito haanan doona ayaaha dalka oo ku gaashaman hab dhaqan iyo aragti caafimaad qaba ayaa talaabooyinka ugu mudan ee dawaladdu xaqiijinta hadafkani ku talaabsatay waxaa ka mid ah oo xusid gaara mudan in qodobada 36aad ee dastuurka oo ah sharaciga ugu sareeya dhamaan shuruucda dalka oo dhan lagu daro islamarkaana aqoonsado qodobo ama arrimaha damaanad qadaya xaqiijinta xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta.

Dalka Itoobiya wuxuu ku talaabsaday dadaalo kala duwan oo lagu horumaarinayo islamarkaana dhawrayo xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta talaabooyinkaas oo ay ka mid yihiin aqoonsiga baaqyada qaraadeed iyo kuwa calaamiga ah, ku darida ama lamaaneynta shuruucda qaranka iyo sidoo kale, dhismaha nidaamka iyo qaab-dhismeedka sharci iyo maamul ee lama huraanka u ah caruurta.

Dawladda Itoobiya waxay lagama maar maan u aragtay dajinta Siyaasada qaran ee caruurta oo dhamaystiraan si ay u joogteyso islamarkaana u cadeeyso mawquufkeedu ka go'naansho eek u aadan ixtiraamka, ilaalinta iyo dhamaystirka xuquuqaha caruurta islamarkaana ay kor u qado doorka qoyska iyo bulshada kaga aadan geediga dhismaha iyo barbaarinta caafimaadka , koriinka iyo sharafta iyo dadnimada caruurta oo taam ah. Siyaasadani waxay jeexaysa jahooyin lagu mideynayo dadaalka dhamaan hay'addaha bahwadaagta ah oo kala ah qoyska, mujtaamaca, dawladda, hay'addaha aan dawliga ahayn iyo uruurada horumaarinta ee qaraadeed iyo caalamiga ah.

Siyaasadu waxay leedahay sadeex tiir oo asaasiya oo guud ahaan ku saabsan caruurta reer Itoobiya;

- Barbaarinta iyo koboca suuban ee caruurta (Children's development and growth)
- Ka hortagga iyo ka badbaadinta caruurta xadgudubyada iyo gaboodfalada bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeed;
- In caruurta ku jira duruufo adag in loo fidiyo adeegyo dib u dajin, daryeel iyo tageero-siin;

Guud ahaan qaab-dhismeedka iyo dulucda siyaasadani waxay u habeeysan tahay kana kooban tahay lix qaybood: ayay qaybta koobaad xambarsan tahay islamarkaana ay iftiiminaysa xalaadaha guud ee caruurta Itoobiya ku sugan yihiin, iyo ahmiyada siyaasadani leedahay; Qaybta labaadna waxaa lagu faah-faahiyay himilada, ujeedooyinka, mabadiida siyaasada; qaybta sadexaadna waxay ku saabsan tahay arrimaha ugu waa weyn ee Siyaasada; halka qaybta Afraadna ay ka hadlayso xeeladaha iyo stiraatijiyadaha hirgalinta Siyaasadani; qaybta shanaadna waxay faah-faahinaysa doorka iyo wajibaadka hay'addaha bahwadaagta ah kaga aadan sugida ixtiraamida, ilaalinta iyo kor uqadiida xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta; Halka qaybta lixaad ee ugu dambeeysana lagu soo bandhigay dabagalka iyo qiimaynta hanaanka fulinteed ee Siyaasada.

## Qaybta koobaad

### 1. Xalaada Guud ee Caruurta Itoobiya Iyo Ahmiyada ay Leedahay Siyaasada Qaran ee Caruurta

### 1.1. Xalaada Guud ee Caruurta Itoobiya

Waxaa qaybaha hoose lagu tibaaxay xalaada arrimo bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeed ee caruurta iyo sidoo kale talaabooyinka lagu xaqiijinayo xuquuqaha, fayaqabka iyo baahiyaha caruurta dalka. Iyo guud ahaan xalaada soo jireenka ah ee ay ku sugnayeen xalaada caruurta dalkeenu.

#### 1.1.1. Xalaada Arrimaha Dadwaynaha

Kadib markii dawladdu dajisay islamarkaana dhaqangalisay siyaasada arrimaha dadwaynaha sidoo kalena horumarisay adeegyada caafimaad, waxbarasho, kabayaasha dhaqaale iyo barnaamijka kaydka iyo isku filnaanshaha cuntada islamarkaana bulshada loo fuliyay adeegyada arrimaha bulshada iyo dhaqaalaha korna loo qaday wacyiga iyo aragtida bulshada ayaa waxaa suurogalay in guulo la taaban karo laga soo hooyo islamarkaana isbedel xoogan ku yimaado dhimashada caruurta, adeega caafimaadka taranka , qorshaha kala koorinta qoyska iyo kaalinta ka qaybgalka caruurta ee arrimaha waxbarashada.

#### 1.1. 2. Xalaada arrimaha caafimaadka

Arrimaha ugu waa weyn ee mudnaanta lagu siiyay siyaasada caafimaadka dawladda Itoobiya, qaraarada kala duwan ee dhawrista xuquuqaha caruurta iyo yoolasha hirgalinta horumar joogto ah ayaa waxaa kaalinta koobaad kaga jira dhimista dhimashada caruurta. Hadaba, dawladdu iyadoo ka duulaysa yoolasha iyo hadafka kor ku xusan ayay waxay tobankii sano ee la soo dhafay ay meel-maarisay dhismayaal caafimaad oo waa weyn sidoo kalena ay dajisay oo fulintooda gacanta lagu haya siyaasado, stiraatijiyado iyo mashaariico kala duwan oo lagu horumarinayo xalaada caafimaad ee caruurta.

Hadafka ugu weyn ee qorshaha labaad ee isbedelka iyo koboca ee 2007 waxaa diirada lagu saray sidii hoos loogu dhimilaha xadiga dhimashada caruurta dhasha. Taasi oo ah in 1000 kii unug ee hal sano jir ahba dhimashadoodu hoos loogu dhimo

28%, 1000 qof/unug ee da'doodu ka hooseeyso shanta sano jirkana dhimashadooda hoose loo dhigo 44% halka 1000 unug ama ilmo ee da'doodu gaadhay shan sano jirka in hoose loo 64% sidoo kalena, qorshaha 2007 ee isbedelka iyo koboca dhaqaaluhu wuxuu muujinaya in caruurta da'doodu ka hooseeyso shanta sano in haagaskooda hoos loogu dhigo/dhimo 40% halka 9% hoos loo dhigay caruurta nafaaqo daro u taabaloowda.

Sabaabaha ugu waa weyn ee dhaliya dhimashada waxaa ka mid ah cudurka qaxaada, duumada, shubaanka, hiiqdheerta, nafaaqo darada ( siiba gabdhaha) iyo cudurka HIV/AIDSka . Sidoo kale, waxaa ka qaybqaata oo hoos u dhiga dadaalada loogu jiro hoos u dhigida dhimashada caruurta ficillada ay ka midka yihiin nadaafad xumada hooyada, helitaan la'aanta biyo nadiif ah oo la cabo, ku dhaqan la'aanta qorshaha qoyska iyo ku cadeeysiga caadooyinka xun.

Inkasta oo hay'addaha iyo uruurada caafimaadku ay ku talaabsadeen islamarkaana guulo ka soo hooyeen dhanka gaadhsiinta adeegyada caafimaadka haddana waxaa muuqata in goddaloolooyin badani ka jiraan dhanka gaadhsiinta iyo helitaanka adeegyada caafimaadka asaasiga gaar ahaan, adeegyada asaaska u ah caafimaadka caruurta. Sidoo kale, waxaa muhiim ah oo loo baahan yahay in wax badan laga qabto xalaada caafimaad ee caruurta ku nool degaamada miyiga iyo degaanada bulshada xoolo-dhaqaatada ama xoolo-dhaqaato bweeralayda ah. Sabaabto ah caruurta degaamadas ku nooli waxay marwalba u nugul yihiin oo ay dhiibaato ka soo gaadha ay u dhintan xanuuno la daweeyn karo haddii ay heli lahayeen adeeg caafimaad oo hufan.

### 1.1.3. Xalaada Waxbarashada

Hay'kalka ka qaybgalka caruurta ee waxbarashadu waxa uu dhigayaa in da'da waxbarashada barbaarintu ka bilabanto afar sano jir, halka waxbarashada dugsiga hoose ka bilaabanto 7 sano jir, waxbarashada dugsiga sare iyo waxbarashada isku dhafan ee dadka waawayna ka bilaabanto (15 -18) sano iyo da'da waxbarashada xarumaha farsamada gacanta iyo xirfadaha oo ah (15-18 ) sano jir.

Madaama oo la  soo saaray islamarkaana la dhaqangaliyay siyaasada tilmaamaysa waxbarashada iyo daryeelka dugsiyada bar'barinta caruurta ayaa laga bilaabo sanadkii 2008TI heer daboolka waxbarshada barbaarinta la gaadhsiiyay boqolkiiba  45, saamigani oo boqolkiiba 48 ay yihiin haween, halka samiga raguna ay ka gaadhayan boqolkiiba  50. Badanaa xarumaha barbaarinta caruurtu madaamo ay yihiin kuwa ka jira magaalooyinka oo haay'adaha aan dawliga ahayn ay ka qaadan qiimo aad u sareeya ayaa waxaa adkaatay in waalidiinta ku noolmagaalooyinka ee tamartooda dhagaale liitado ay ka qaybgalaan islamarkaana ka faaiidaystaan adeegyada waxbarasho.

Isla sidaasi oo kale laga bilaabo mudadii la soo saaray siyaasada waxbarshada itoobiya natiijada laga soo hooyay wareega koowad ee waxbarshada dugsiyada hoose fasalada 1aad ilaa 4aad oo lagu daray waxbarshada reer guuraaga oo dhan wadartooda guud ee samiga ka qayb galka waxbarshadu waa boqolkiiba 137.08 halka tiradani saamiga haweenku ka yihiin boqolkiiba 22 iyo saamiga raga oo ah boqolkiiba 32. Duuduubka wadarta saamiga ka qaybgalka wareega 2aad ee waxbarshada dugsiyada hoose ee fasalada 5aad ilaa 8aad iyada oo ay boqolkiiba tahay 72.84 ayay saamiga haweenku ka yahay boqolkiiba 70.96, halka raguna ka yihiinka boqolkiiba 71. Haddaba saamiga ka qaybgalka waxbarshada ee guud ahaan waxbarshada dugsiyada hoose (1-8) oo lagu daray waxbarshada reer guuraaga iyada oo uu boqolkiiba yahay 98 ayay saamiga haweenku ka yihiin boqolkiiba 1.6, halka saamiga raguna yahay 109.72.

Saamiga ka qaybgalka wareega koobaad ee waxbarashada fasalada /1aad-4aad/ marka la isku-dheelitiro boqolkiiba waa 111.24 oo tiradani saamiga haweenku waa 107.2 halka ragguna ama wiilashu ka yihiin 111.2. xadiga saamiga ka qaybgalka wareega labaad ee waxbarashada heerka koobaad ee fasalada /5aad-8aad/ boqolkiiba waa 60.1 ayay saamiga haweenku ka yihiin 59.8 boqolkiiba halka saamiga labkuna yahay boqolkiiba 65. Halka xadiga saamiga ka qaybgalka waxbarashada heerka koobaad ee fasalada /$1^{aad}$-$8^{aad}$/ u boqolkiiba yahay 97.12 iyadoo saamiga haweenkuna yahay boqolkiiba 93.96 halka saamiga ragguna boqolkiiba ka yihiin 100.2.

Saamiga xadiga ka qaybgalka waxbarashada sare ee wareega koobaad (9aad-10aad) boqolkiiba waa 48.2 halak cel-celiska saamiga haweenku tiradani ka yihiin ay tahay boqolkiiba 46.44, halka saamiga ragguna yihiin boqolkiiba 50.16. Halka Saamiga xadiga ka qaybgalka waxbarashada sare ee wareega labaad fasalada (11aad-12aad) uu boqolkiiba ka yahay 11.26 iyadoo saamiga haweenku ka yihiin boqolkiiba 10.383 halka saamiga ragguna boqolkiiba ka yihiin 12.12. Wadarta guud eecel-celiska saamiga qaabiilaada wareega labaad ee waxbarashada sare ee fasallada (11[aad] --12[aad]) u yahay 457,222 oo saamiga ka qaybgalka haweenku boqolkiiba ka yihiin 47.

Cel'celiska saamiga ardayda dhamaysata waxbarshada dugsiyada hoose (1-8) iyada oo uu boqolkiiba yahay 56.54 ayay haweenku ka yihiin boqolkiiba 55.58, halka saamiga raguna yahay boqolkiiba 57.49. celceliska qiyaasta ku celiska wareega 1aad ee waxbarshada dugsiyada hoose uu boqolkiiba yahay 5.6 ayay saamiga haweenku boqolkiiba yahay 5.5 saamiga raguna boqolkiiba 5.8. sidoo kale ceceliska qiyaasta ku celiska wareega 2 aad ee waxbarshada dugsiyada hoose uu yahay boqolkiiba 5. Ayay saamiga haweenku boqolkiiba yahay 4.8, saamiga raguna boqolkiiba 5.3.

Waxbarashada isku dhafan ee dadka waawayn ee da'doodu u dhaxayso (15 – 18) ee aan waxna akhriyin waxna qorin ee waxbarshada isku dhafan ee labadiisano ee la soo dhaafay heerka hoose ee uu hadda taagan yahay inla gaadhsiiyo boqolkiiba boqol islamarkaana kuwa da'doodu u dhaxayso (15 – 18) sano ee gala xarumaha farsamada gacanta iyo xirfadaha in ay ku guulaystaan in ay dhamaantood dhamaystan oo ay ka soo qalinjabiyaan ayaa layskula qaatay qorshihii shanaad ee horumarinta qaybta waxbarshada.

Inkasta oo hawlaha laga qabtay dhinacyada waxbarashada guud, waxbarashasda farsamada gacanta iyo xirfadaha iyo waxbarashada isku dhaafan ee dadka waa weyn ay yihiin kuwo aad loogu diirsan karo oo dhirigalin mudan haddana ilaa haddana saamiga ka qaybgalka ee qaybahani waxbarasho laguma guulaysan in la gaadhsiiyo heerkii loo baahna. Gaar ahaan haweenka miyigu sabaabo la xidhiidha aragtiyaha guraacan ee laga aamiinsan yahay haweenka iyo ficillada caadooyinka xun ee lagula kaco gabdhaha awgeed,

waxay keentay in ilaa hadda ay dhaliilo baxaad leh ka jiraan in gabdhuhu ayna si la mid ah wiilasha uga fa'iidaysan islamarkaana uga qaybgalin geediga waxbarashada.

### 1.1.4. Arrimaha ka qaybgalka caruurta

Si kor loogu qaado arrimaha ka qaybgalka caruurta wuxuu dalku ku talaabsaday talaabooyin wanaagsan oo bilaaw ah. Nidaamyada iyo qabaabka ay caruurtu ku soo bandhigi karan afkaartooda iyo ra'yigooda oo xor ah waxaa ka mid ah qaabdhismeedyada caruurta ee sida barlaamaanka caruurta ama kooxaha ardayda ee ka dhisan dugsiyada waxbarashada, maamulada heerarka kala duwan. Waxaa jira oo dhisan goleyaal ka badan 500 boqol oo gole barlaamaan oo ah caruurta, sidoo kale waxaa dugsikasta oo waxbarasho kala dhisan kooxaha/naadiyo ardayda oo ku hawlan hirgalinta hawlo badan oo la xidhiidha ilaalinta iyo hirgalinta xuquuqaha caruurta.

Xaqa caruurtu u leeyihiin inay afkaartooda six or ah oo madaxbanaan u soo bandhigan waa mid lagu xeeriyay shuruucda kala duwan ee dalka iyo heeshiisyada calaamiga ee Itoobiya qaybta ka yahay ama ansixisay. Habase ahaate, haddana waxay dhaliilo badani ka jiraan dhanka fulinta iyo ka fa'iidaysiga xuquuqahasi. Arintas oo ay sabaab u tahay ka go'naansho la'aanta hay'addaha fulinta ee dawladda, aragtida baahsan ee bulshadu ka aamiinsan tahay xuquuqaha caruurta iyo wacyiga qoyska ee ku aadan ka qaybgalka iyo ilaalinta xuquuqaha caruurta oo liita. Iyo sidoo kale waxqabadka qaab-dhismeedka caruurta oo aan ahayn mid gaadhsiisan heerkiisi iwm. Sidaasi awgeed, waxaa ilaa hadda jiraa oo muuqda goddaloolooyin dhanka dhaqangalinta siyaasadaha iyo xuquuqaha caruurta. Arintaas oo caqaabad ku noqotay isticmaalka iyo ka fa'iidaysiga xuquuqahas ee caruurta, gaar ahaan, gabdhaha oo aan ilaa hadda helin fursad ay ku soo bandhigan afkaarta oo xor ah.

Hadaba, si loo xoojiyo ka qaybgalka caruurta, inkasta oo ay jiraan talaabooyin wanaagsan oo bilaaw ah iyo stiraatijiyado, barnaamijyo,iyo qorshayaal shaqo oo la xidhiidha horumaarinta iyo hirgalinta xuquuqaha iyo xooriyadaha caruurta ayaa

haddana waxaa si weyn u muuqda oo loo baahan yahay in wax badan laga qabto si loo abuuro ka qaybgal caruureed oo macno leh.

### 1.1. 5. Caruurta oo loo Abuuro Qoys iyo Bi'ad ku Haboon Kooriinkooda

Waxaa hubaal ah in qoysku yahay unug dhismeed daabici ah oo u uduubdhexaad u ah barbaarinta iyo daryeelka caruurta. Sidoo kale, qoysku waxaa goobta ugu horeeysa ee ka taaransado ama ka dhaxaalo guud ahaan xalaadaha iyo duruufaha kala duwan ee qaab noolooleed iyo dhaqanka iyo hidaha suuban ee bulshada ay la noolyihiin. Hadaba, la noolanshaha caruurta ee qoysaskoodu iyo degaanka/jawiiga ay ku soo barbaaran wuxuu akhlaaqda iyo dadnimada caruurta ku leeyahay saameeyn weyn oo wanaag iyo xumaanba iskugu jirta. Sabaabta oo ah ilmuhu haddii u yahay mid qoyskooda iyo bi'adaba kala kulmay kalgaca iyo xushmaad wuxuu inta badan noqda qof dabeecad iyo akhlaaqad wanaagsan leh maskaxiiyana dhisan. Lakiin haddii ilmuhu qoyska iyo bia'ada u ku soo barbaaray uu xumaan ka soo taaransaday, wuxuu noqda mid cuqdaad iyo xumaan ku kora oo mustaaqbalkiisu inta badan u xumaado. Hadaba, qoyska wuxuu wajibaad iyo masuuliyad balaadhani ka saran tahay koriinka iyo barbaarinta suuban ee ilmahooda. Haddana iyadoo arrintu sidaasi tahay, waxaa hubaal ah in qoysas badani ay wajibaadkaas saran si haboon gutaan oo ay caruurta u barbaarayan hanaan dhaxaalsiinaya asluub iyo akhlaaq suuban ayaa haddana waxaa dhacda in qoysas badan oo aan tiradooda la soo koobi Karin ay sabaabo la xidhiidha fahan darada isticmaalka qorshaha kala koriinta qoyska, aqoon la'aanta arrimaha maamulka qoyska awgeed, ay markasta qoyska Isfahan daro iyo ismaandhaaf ka dhex-abuurta kadibna ay kalifta in qoyskuba wajaaho burbur, taasna ay keento dayaacd ku timaada caruurta. Islamarkaana ay wajaahan dhiibaatooyin iskugu jira mid caafimaad iyo arrimo bulsho halkaasna u ku luumo mustaaqbaalkoodu.

Inkasta oo qoysas fara badan ka fa'iidaysteen horumaarka xawiiga ku socda ee dalkeenu ku talaabsaday haddana waxaa jira guud ahaan qoysas badan oo ay nooloshoodu aad u hooseeyso oo ku jira xalaad saboolnimo oo aan caruurta ua woodin inay si fiican barbaarinta fiican ee caruurtooda. Hadaba, caruurta ka tirsan qaybaha bulshada noocas ah waxay markasta u nuguul yihiin ama haysta

dhiibaatooyin iskugu jira kuwa arrimaha bulshada iyo arrimaha caafimaadka iyo cilmi nafsiga la xidhiidha. Sidoo kale caruurtaasi waxay wajaahan dhiibaatooyin fara badan oo ay ka mid yihiin cuno yaraan, waxbarasho la'aan, iyo caafimaad daro islamarkaana si ay qoysaskooda u cawiiyan waxay ku kalifta inay waxbarashada ka baxan oo ay looxtuuran, kadibna ay ku kalifto inay cidkale u shaqeeyan, in qoyskooda iyo degaankooda ay ka caraaran oo ay tagan meelo ayna garaaneyn, inay daarbi jiif noqdaan kadibna ay tuugsadan iyo dhiibaatooyin kale oo badan oo caruurta u horseeda una nugleeysa ficilo ka dhan ah damiirkooda iyo dadnimadooda. Arrintaas oo raad xun reebaysa g/socodka horumar ee dalkeenu hadda ku talaabsaday.

Caruuraha sabaabo rasmiya iyo kuwa ku meelgaadh ahba uga maqan qoysaskooda ayaa waxaa loo abuuray fursado takulayn iyo tageero ay uga heli lahaayeen hay'addaha kala duwan ee dalka ka jira. Adeegyadas waxaa ka mid ah in caruurta sabaabo la xidhiidha koorinkooda awgeed, dalka dibaadiisa loo qaadi jiray oo ay ka midnoqon jireen qoysaas ayna isku dhaqan iyo hidaba lahayn oo ay kala kulman dhiibaatooyin badan oo ay ka mid yihiin dhinaca dhaqanka, luuqada iyo la qaabsiga bi'adaas taasina ay caruurta dhaxaalsiiso inu ka luumo dhaqanka iyo isiirka iyo haybta ay ka soo jeedan. Kadibna ay wajaahan dhiibaatooyin hor leh oo la xiidhiidha dhanka arrimaha bulshada, caafimaadka iyo cilmi-nafsiga. Ayaa hadaba, si looga waantoobo dhiibaatooyinkaas aan kor ku soo sheegnay ayaa hadda la suuragaliyay in adeegyadas takulaynta iyo tageerada caruurta laga hirgaliyay dakla gudahiisa si looga kaaftoomo adeegyadaas dalka dibaadiisa loo tagi jiray.

Madaama markasta oo la hirgalinayo dhismayaasha gaarka loo leeyahay iyo kuwa dawladdaba iyo horumaarka kabaayaasha dhaqaaluhu aysan ahaynkuwo ku xisaabtamay baahiyaha iyo duruufaha caruurta islamarkaana dhismayaashasi ayna ahayn kuwa caruurta u sahlaya helitaanka iyo ka fa'iidaysiaga baahiyaha iyo duruufaha kala duwan ee caruurtu qaban. Ayaan hadaba markasta muuqata iyadoo caruurtu ku ciyaareysa jidadka waa weyn dhexdooda ama agagaarkooda. Sidoo kale madaama guryaha hoyga iyo xaruumaha adeegyada caruurta bixiya ay ku dhaaw yihiin goobaha lagu isticmaalo maandooriyayaasha

khaatar ah, shishada iyo jaadka iyo sidoo kale goobaha lagu dawaada filimada sharci darada ah ee lidka ku ah dhaqanka suuban, goobaha haweenka jidhkooda ka ganacsada, mukhmaaradaha, iwm ee sameeynta xun ku leh akhlaaqda iyo barbaarinta suuban ee caruurta, oo laga dabargoyo lagana foogeeyo goobaha waxbarashada, hoyga iyo meelaha degamaada ay degan yihiin hay'addaha caruurta u fidiya adeegyada lama huraanka u ah caruurta. Sidaasi awgeed, si loo xushmeyo loona ilaaliyo xuquuqaha, fayaqabka iyo baahiyaha kala duwan ee caruurta waxaa lagama maar maan ah in dhismayaasha gaarka loo leeyahay, dawladda iyo kabaayasha horumaarinta dhaqaale ee dalka laga irgalinayo ay noqdaan kuwo ku xisaabtama daboolista baahiyaha kala duwan ee caruurta haysta islamarkaana ay noqdaan kuwo xoojiya oo horumaariya dhaqanka iyo akhlaaqda suuban ee caruurta dalkeena.

### 1.1.6. Caruurta ay Haysato Duruufo adag oo Nolooleed

Caruurta ay haysato duruufo adag oo noolooleed waxay mudan yihiin inay helaan tageero ka badan mida la siiyo caruurta kale. Tiraakoobka dadka iyo gurayaha ee la sameeyay sanadkii 1999 T. I, wuxuu tilmaamaya in tirada caruurta ay Haysato Duruufo adag oo Nolooleed iyo caruurta sabaabo kala duwan ku waayey waalidkoodii ay dhan tahay 3,814,526 oo dhalaan. Sidoo kale, waxaa tirakoobku wuxuu tibaaxay in ay jiraan caruur badan oo darbi-jiif ahii oo ay haysato dhiibaatooyin badan oo u nuguul balwaadaha iyo dambiyo. Caruurtaas tacaadiyada lagula kaco ay u badan yihiin kuwa loo geeysto gabdhaha. Arrintaas oo raad weyn ku reebta cawaaqibka mustaqbaalka dambe ee caruurtas.

Waxaa kale oo jira caruur aan tiradooda la soo koobi Karin oo dalka gudahiisa iyo dibaadiisaba ugu dhiibaataysan sabaabo la xidhiidha ka ganacsiga suuqa madaaw ee lagula kaco caruurtas. Caruurta qaabkani oo kale loo tahriibiyo dambiyada iyo taacadiyada lagula kaco waxaa ka mid ah ku xoogsaga, galmada, iyo xubno muhiim ah oo jidhkooda lagala baxo iyo iwm. Taacayidaas oo ugu dambeeynta caruurta u horseeda laxaad la'aan oo ay noqdaan naafo iyo in ay ku reebto raad xun oo dhanka maskaxda la xidhiidha oo saameeya mustaqbaalkooda nolooleed ee xiga.

Caruurta laxaadka la', caruurta ku kaca faldambiyeed, caruurta waalidkooda kula jira xaruumaha dhaqancelinta ee dadka lagu xidho, caruurta ku waxyeelooba dhiibaatooyinka daabiciga ah iyo kuwa aan daabiciga ahayn iyo caruurta ku nool xalaad nolooleed oo adag maa helaan xalaad ay ku helaan adeegyada arrimaha bulshada iyo dhaqaalaha ee noolooshooda iyo barbaarintooda kaalinta weyn ku leh. Waxaa kale tirakoobka dadka iyo guryaha ee la meelmaariyay sanadkii 1999 u tilmaamay in tiro caruurta oo dhan 231,192 ay ku naafobeen dhiibaatooyin la xidhiidha arrimaha bulshada iyo kuwa maskaxeed ay u dheer yihiin jiritaan la'aanta adeegyada kala duwan ee arrimaha bulshada oo aan ahayn kuwo saciidaya ama aan ku habooneyn baahayaha iyo duruufaha kala duwan ee caruurtu qaban,

Dhanka kale, waxaa arrin muhiima oo u baahan in mudnaan la siiyo waxka qabashada caruurta ku nool deegaamada bulshada xoolo-dhaaqatada iyo xoolo-dhaaqato beeralyada ah, degaamadaas oo ah goobo nooloolshu ku saleeysan tahay nool reer guuranimo islamarkaana ayna ka jirin adeegyada horumaarinta asaasiga ah iyo cuno yaraan baahsan oo raad weyn ku leh islamarkaana kala dhaantasha nooloosha tiro badan oo ku nool degaamadaas.

Inkasta oo talaabooyinka iyo dadaalada ay dawladdu waxkaga qabaneeyso dhiibaatooyinka haysta caruurta duruufo adag oo noolooleed ku jira ee aan qaybaha sare ku soo sheegnay, hadana talaabooyinkaasi maaha kuwo ku filaan oo si deg-deg ah wax uga qaban karaya dhiibaatooyinka baahsan ee haysta caruurtas islamarkaana ayna wada dabooli kareyn baahiyaha kala duwan ee jira. Sidaasi awgeed, waxaa loo baahan yahay in la meel-maariyo oo la joogteeyo qorshayaal iyo barnaamijyo xoogan oo lagu takuleeyo caruurta ay Haysato Duruufo adag ee Nolooleed.

### 1.1.7. Caadeeysiga iyo ku dhaqanka Caadooyinka Xun-Xun

Daraasad u saameeyay uruurka la dagaalanka iyo darbargoynta caadooyinka xun-xun sanadkii 2000. Wuxuu tilmaamaya in dalka Itoobiya yahay dal ay ku wada nool yihiin qoomiyado, shuucub iyo dadyoow fara badan islamarkaana u ka kooban yahay degaano kala duwan oo lagaga dhaqmo cadooyin xun-xun oo

tiradoodu kor u dhaafeyso ilaa 140 nooc oo caado. Kuwaas oo ah kuwa intooda badan lagula kaco oo lagu waxyeeleeyo caruurta da'yarta ah. Caadooyinkaas xun-xun waxaa ka mida oo ugu waa weyn gudniinka fircooniga ah, guurka deg-dega ah, qaanjiidhka la go'yo , ilka daacawada la soo saaro, la bixida gabdhaha, guubista faaraha, foolka oo la iska saaro, jidhka oo la jeex-jeexo, dhiga oo la iska daadiyo, faruurta hoose oo dhagaax laga laad-laadiyo,iwm. Ku dhaqanka caadooyinkaas xun-xun waxay leeyiihiin raad iyo waxyeelooyin xun oo muqaal, maskaxeed iyo damiir iyo dhiibaatooyin arrimo bulsho ee ay caruurta u geeystaan ka sookow, waa in dhiibaatooyin muddo badan soo haystay caruurta oo si xoogan u kala dhaantalay nooloosha iyo ayaaha caruurta. Arrimahani oo sabaabay Tiro badan oo caruurta ka mid ahii ay u dhintan islmarkaana u dhawaac joogto ah ka soo gaadho iyagoo ku jira wakhtigii da'da curdiinka ah. Hadaba, ku dhaqanka caadooyinka xun waa dhiibatooyinka ugu baa'an ee haysta caruurta siiba gabdhaha da'yarta ah ee aan wali qaangaadhin.

### 1.1.8. Diwaan Galinta Marxalaadaha Caruurta

Inkstoo qabka iyo nidaamka loo diwan galiyo dhalashada iyo marxaladaha kale ee muhiimka si cad loogu faah-faahiyey xeerka madaniga ah ee dalka itoobiya. Ayaa Hadana maadaama ayna jirin qaabdhismeed u gaara oo sii meelmaariya nidaamka diiwangalinta dhalashada iyo nidaam guud oo midaysan oo lagu diwaan galiyo dhalashada iyo marxaladaha kale ee muhiimka ah ayaa arrintaas waxay sabaabtay in aan dhalashada aan la diiwaangalin 90% taasi oo ay ku dhacaan bila shahaado.

Hadaba diwaangalin la'aantu dhibaatooyinka ay maamul iyo cadaaladeed ee dawladu ku hayso ,kasokow waxay saamayn weyn ku yeelatay sugida iyo xaqiijinta xuqquda iyo aminiaga carruurta ,habase yeeshee waxaa la filayaa in ay wx badan ka qaban doonto wakhtiga dhibaatooyinkaas aan kor ku soo sheegnay .maadaama ay mudobadan baarlamaanka dalku oo bayaankan ku bayaamiyey wakaalada diwaan galinta marxaladaha muhiimka ah.

### 1.1.9. Kobcinta Wacyiga Bulshada ee ku Aadan Ilaalinta Xuquuqaha Caruurta

Inkasta oo kaalinta qoyska iyo mujtaamucu ku leeyahay baarbaarinta suuban ee caruurtu tahay mid aan wax loo dhiga jirin haddana waxaa aad u hooseeysa oo aan gaadhsiisneyn heerkii loo baahna dadaalada iyo waxqabadka bulshada iyo qoyska eek u aadan Ilaalinta Xuquuqaha Caruurta madaama ayna isku dhigmin heerka waxbarasho, baraarug iyo fahan ee bulshada iyo qoysku u leeyihiin arrimaha Ilaalinta Xuquuqaha Caruurta. Sidaasi daraadeed, si looga midhadhaaliyo dadaalada loogu jiro sugida iyo illaalinta Xuquuqaha Caruurta waxaa muhiim ah oo loo baahan yahay in la kobciyo wacyiga iyo aqoonta qoyska iyo bulshadu u leeyihiin Ilaalinta Xuquuqaha Caruurta islamarkaana ay hormuud uga noqdaan hirgalinta hawlaha kobcinta iyo barbaarinta suuban ee loo fidiyo caruurta dalkeena.

### 1.1.10. Iskaashiga iyo Wada Shaqeeynta

Hawlgalada ku aadan ilaalinta xuquuqaha iyo fayaqabka caruurtu waa mid u baahan iskaashiga iyo wada shaqeeynta hay'addaha ay khuseeyso. Hadaba, waxaa muhiim ah oo loo baahan yahay in dadaaladas iskaashi iyo wada shaqeeyneed ee hay'addaha kala duwan ay noqdaan kuwo qaab qorshaysan oo loo dajiyay hanaan shaqo oo lagu hirgaliyo islamarkaana hay'addkasta ay ka go'naanto oo ay meel-maariso sida hawleeda caadiga ah oo kale. Habase ahaate waxaa jira in iskaashiga iyo wada shaqeeynta ka dhexaaysa hay'addaha fulinta ee heerarka kala duwan ayna ahayn kuwo leh nidaam adag oo deg-degsiimoba leh oo lagu hago laguna xisaabtamo dadaaladaas ay wadaan. Arrintani waxay sabaabtay in iskaashiga iyo wada shaqeeyntooda laga gaadhin natiijo lagu diirsan karo. Sidaasi awgeed, waxaa loo baahan yahay in hay'addaha ay khuseeyso ay si buuxda barnaamijyadooda, mashaaricahooda iyo qorshayaashooda ugu lamaaneeyan arrimaha caruurta islamarkaana u dhaqangaliyan hab wafaaqsan danaha iyo baahiyaha kala duwan ee caruurta.sidoo kalena meesha laga saaro dhiibatooyinka baxaada leh ee u baahan waxka qabashada. Qaab-dhismeedyada haweenka iyo caruurta wuxuu wajibaad ka saran yahay inay dabagal ku saameeyan in siyaasadaha, shuruucda,

barnaamijyada, mashaaricaha iyo qorshayaasha shaqo ee ay dajiyan dhamaan hay'addaha dawliga ah in lagu lamaaneeyay arrimaha caruurtu.

## 1.2. Ahmiyada siyaasadani

Itoobiya waxay soo saartay islamarkaana hirgalisay xeerka qoyska, xeerka ciqaabta iyo xeerka shaqada iyo loo shaqeeyaha oo ku jahaysan ilaalinta iyo dhawrista xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta islamarkaana gaashaan looga noqdo noockasta oo ku xoogsi, caadooyinka waxyeelada leh ee xun iyo dhamaan qabaabka kala duwan ee gabool fal iyo xadgudub ee caruurta ka soo gaadha qoyska dhexdiisa, dugsiyada waxbarashada iyo mujtaamaca dhexdiisaba. Waxaa kale oo dalku saxeexay islamarkaana ansixiyay heeshiisyo kala duwan oo qaraadeed iyo calaamiba ah oo ku taxaluuqa xuquuqaha caruurta, oo ay ka mid yihiin axdiga xuquuqaha caruurta iyo axdiga Afrika ee ku soo baxay xuquuqaha iyo badbaadada caruurta. Dawladdu iyadoo maanka ku haysa axdiga oo koobaya islamarkaana ay ku lamaan yihiin dhamaan xuquuqaha madaaniga ah, siyaasadeed, dhaqaale, bulsho iyo dhaqanba iyo wajibaadka ka saran dhamaan wadaamada saxeexay axdiga in axdigan ay hirgaliyan iyagoo ku dabaqaya duruufaha bulsho iyo dhaqaale ee soo jireenka ah ee dalka waxay ku talaabsatay talaabooyin fara badan oo ay ka mid tahay in heeshiiyada iyo baaqyadani la dhaxgaliyo laguna daro Dastuurka dalka.

Qodobka 36[aad] ee Dastuurku wuxuu ka kooban yahay qodobo qeexan oo asaasi iyo lama huraan u ah ilaalinta/dhawrista xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta: oo u yaala sidan "Ilmokasta wuxuu xaq u leeyahay inu noolaado; inu helo magic iyo jinsiyad; inu gaarto islamarkaana u helo daryeelka iyo kalgacaylka waalidkiisa ama ilaaliyaha sharciga, in aan lagula kicin ficilo lagu adoonsanayo, waxaa ka reeban in lagu qasbo ama loo ogoolaado inay qabtaan ama fuliyan shaqooyin halis ama waxyeelo u leh waxbarashadiisa/deeda, caafimaadka iyo wanaagnaanta; inay ka madaxbanaanadan oo aan lagu xukumin ama ciqaabin xukun dil ah ama naxaaris daro ama dugsiyada waxbarashadu ama hay'addaha masuulka ah daryeelka iyo xanaaneynta caruurtu ayna ula dhaqamin qaab ka baxsan bin'aadamnimada. Dhamaan talaabooyinka la xidhiidha caruurta ee ay qaadan

In all actions hay'addaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay eek a shaqeeya samafalka caruurta,maxkamadaha sharciga, laamaha maamulka ama sharci dajinta waa in ay noqdaan kuwa mudnaanta koobaad siinaya danaha ilmaha''. Waxaa si hufan loo cadeeyay in dhamaan hay'addaha bahwadaagtu ay wajibaadka ka saran ilaalinta xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta ay hanaan munaasib ah u guutan una fuliyan.

Inkasta oo sanadkii 2015 ay dawladdu ay dajisay islamarkaana ansixisay siyaasada daryeelka bulshada, madaama xadka fulineed ee siyaasadu yahay mid balaadhan oo ku jahaysan qaybaha kala duwan ee bulshada maaha mid si waafiya oo dhamaystiraan u xalinaya dhamaan dhibaatooyinka kala duwan ee haysta caruurta oo tirada guud ee bulshada ka kooban boqolka 52. Sidoo kale madaama siyaasadu tahay mid mudnaan gaara siinayso caruurta ay haysato duruufo iyo dhibaatooyin kala duwan oo noolooleed oo kaliya. Sidaasi awgeed, waxaa lama huraan ah in la dajiyo siyaasad, xeelado hawlgal iyo qaab-dhismeedyo si waafiya u wajaaha xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta islamarkaana loo babaariyo caruur ay ku dheehan tahay akhlaaq iyo asluub suuban oo leh dareen masuuliyadeed iyo dad dhexgalba.

Sidaasi darted, waxaa lagama maar maan ah in la dajiyo siyaasada qaran ee caruurta oo dhamaystiraan oo lagu hago dhamaan hay'addaha dawliga ah, kuwa bulshada, qaab-dhismeedyada rayidka ah, hay'addaha diimaha iyo kuwa aan dawliga ahayn iyo bahwadaagta kaleba ay tixgalin gaara siiyan horumaarinta iyo kor u qadiida xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta, barbaarinta jiil suuban islamarkaana ay wajibaadkooda iyo masuuliyada ka saran ay u guutan hanaan u ku dheehan yahay nidaam isla xisaabtan. Sidoo kalena, dajinta siyaasad dhamaystiraan waxaa loogu baahday inay xaqiijiso sida ugu fiican ee danta ilmuhu ku jirto islamarkaana dhamaan hay'aadaha ay khuseeyso ku jahaysaneysa offinta wajibaadkooda ku aadan ilaalinta iyo xaqiijinta xuquuaha caruurta ee lagu xeeriyay Dastuurka.

# Qaybta labaada

## 2. Himilada, Ujeedooyinka Iyo Mab'adiida Siyaasada

### 2.1. Himilada Siyaasada

In la arko caruurta Itoobiya oo xuquuqdooda iyo fayaqabkooda oo la sugay lana ilaaliyay.

## 2.2. Ujeedooyinka Siyaasada

### 2.2.1. Ujeedooyinka Guud

Iyadoo la abuurayo xalaadaha ku haboon sidii caruurtu ugu barbaari lahayd hanaan ay ku dheehan tahay cisii iyo sharaf taam ah islamarkaana loo xaqiijiyay ixtiraamida xuquuqahooda iyo ilaalinta fayaqabkooda in la barbaariyo jiil mustaqbalka haanan kara hogaanka dalka oo ku gaashaman akhlaaq iyo anshax suuban.

### 2.2.2. Ujeedooyinka Faah-faahsan

b). suurtogalinta in caruurta ku sugan marxalaad nolooleed oo qalaafsan ay ku barbaaran dhaqanka ummda toobiya, caadooyinka, hidaha iyo milgaha bulshada ee degaankaas lagu tageero ama kabo barnaamijyada daryeelka bulshada, korsaashada dalka dhexdiisa, qaab qos ahaan lagu kooriyo iyo barnaamijyada dib u dajinta iyo dib u mideeynta ilamaha iyo waalidkooda.

t). iyadoo lagu talaabsanayo talaabooyinka lagu dabargo'ynayo islamarkaana hortagayo si aan caruurta lagula kicin ficilada cadooyinka xun iyo arrimaha lidka ku ah bulshada, xadgudubyada, tahriibka sharci darada ah iyo ku xoogsiga iyo ka fa'iidaysiga xooga caruurta ee caqabaada ku ah habsami u koriinka iyo barbaarinta suuban ee caruurta.

j). Suurtogalinta in caruurta baahiyaha gaarka qaba iyo kuwa taageerada gaarka ahba u baahan loo fidiyo lana gaadhsiiyo adeegyada tageero iyo daryeel ee lama huraanka u ah;

x). adkeeynta isku xidhnaanta iyo iskaashiga ka dhexeeya dhamaan hay'addaha bahwadaagta si meesha looga saaro kala daadsanaanta adeegyada iyo dadaalada loola golleeyahay kor u qadiida iyo horumaarinta daboolida

baahiyaha caruurta iyo xaqiijinta xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta oo dhan;

kh). In caruurta loo abuuro fursado iyo fagaarayaal waafaqsan da'da iyo garaadkooda oo u horseedaya inay si madaxbanaan augu bandhigan uga qaybqaatan arrimaha taabanaya danahooda.

D). suurtogalinta hanaan sahlaya in hawlgalada iyo talaabooyinka ay ku talaabsadan dhamaan qaybaha ay ku khuseeysa yihiin kuwa mudnaanta siinaya danaha iyo fayaqabka caruurta;

## 2.3. Mab'adiida Siyaasada

### 2.3.1. Xaqa Noolasha, Badbaadada Iyo Barbaarinta suuban ee Caruurta

Hay'adkasta masuuliyada iyo wajibaad kama sarana ixtiraamka xaqa ilmuhu u leeyahay inu nolaado iyo fulinta baahiyahooda oo kaliya maaha ee waa inu xaqiijiyo qaadista talaabooyin caruurta lagaga badbaadinayo dhimashada iyo xaqa ay u leeyihiin inay jawii fiican oo munaasib ah ay ku barbaaran;

### 2.3.2. Mudnaansiinta Danaha iyo Fayoqabka Caruurta

Qoyska, mujtaamacu, hayaddaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn ee samafalku hayadaha cadaaladu, maamulku ama hayada sharcidajintu markasta oo ay fulinayaan hawlo khuseeya caruuta waxaa looga baahan yahay in ay mudnaanta siiyaan dahana iyo fayo qabka caruurta.

### 2.3.3. Ka Madaxbanaanida Eex iyo Takoor

Waxaa reeban in caruurta lagu faquuqo islamarkaana lagu takooro shuruudo la xidhiidha isir, diin, luuqad, midab, jinsi, qoomiyad, laxaad la'aan ama shuruud kasta oo kale.

### 2.3.4. Ka Qaybgalka Caruurta.

Waxaa la ogsoon yahay in koriinka fiican iyo barbaarinta suuban ee ilmuhu ay ku xidhan tahay taageerada iyo ka qaybgalka joogtada ah ee ay u fidiyaan qoysku, mujtamacu, hayadaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn. Hase ahaatee ka qaybgalka caruurtu ay ku yeelanayaan arimahooda maadaamo ay tahay

kaalin aan waxba lagu doorsan Karin, kor u qaadiska ka qaybgalka caruurtu waa lama furaan.

## Qaybta Sadexaad

### 3. Arrimaha Ugu Waawayn ee Siyaasada

#### 3.1. Ilaalinta Xuquuqaha Madaaniga ah Iyo Xooriyada Caruurta

B. taabagalinta nidaamka diwaangalinta marxaladaha muhiimka ah ee caruurta iyo xaqiijinta taabagalnimadooda.

T. suurtagalinta jawiga ku haboon ee caruurtu ka qaybgal ugu yeelanayaan islamarkaana iyada oo hadba la eegayo heerka da'dooda ay kaga go'aan gaadhayaan arimaha qoyska, arimaha mujtamaca, dugsiyada waxbarsho iyo arinkasta oo caruurta khusaysa oo ay dawladu soo sarto.

J. suurto galinta in caruurta laga ilaaliyo si ayna u soo gadhin noockasta oo eex iyo takoor ah.

X, in caruurta laga ilaaliyo si aan loogula kicin nooc kasta oo gabood fal galmo, jidheed, damiir, ku xoogsi iyo tahriibka sharcidarnada ah.

Kh, in lasuurta galiyo talaabo kasta oo lama huraan u ah sidii loo ictiraamilahaa xaqa nolosha iyo koriinka ee caruurta.

D. suurtagalinta in caruurta loo sugo xaqa ay u leeyihiin helitaanka macluumaad.

R. in caruurta maraysa geedi socodka cadaaladmarinta ay helaan go'aan deg deg ah islamarkaana la xaqiijiyo in nidaamka cadaaladu yahay mid ku haboon islamarkaana saacidaya caruurta.

#### 3.2. Caruurta Iyo Daryeelka Qoyska

B, in dhamaan la gaadhsiiyo lana sii xoojiyo tababarada kala duwan iyo adeegyo taageero oo baladhinayo ilaha dakhli ee qoyska ee lagu kobcinayo awooda dhaqaale ee waalidiinta si ayna caruurtu ugu nug laan islamarkaana ay u asiibin dhibatooyinka kala duwan ee dhaqale iyo bulsho ee caruurta ku soo gaadha sobobo la xidhiidha saboolnimada.

T. suurtagalinta xaaladaha ku haboon ee waalidka lagu siinayo adeeg la talin ee lama huraanka u ah in ismaan dhaafyada soo wajaha qoyska loogu xaliyo hanaan xasiloon is ayna caruurtu ugu nuglaan islamarkaana ayna u asiibin

dhibaatooyinka kala duwan ee bulsho ee ka dhasha ismaan dhaafka, furiinka iyo kala taga qoyska.

J. si caruurtu ugu bar'baraan hanaan leh dadnimo iyo koriin fiican leh oo ay ku dheehan tahay daryeelka iyo gal gacaylka waalidka waa in walidka shaqaalaha ah loo abuuro jawi munaasib ku ah gaar ahaan hooyooyinka goobaha shaqada iyo hoyga.

X waa in waalidka/koriiyayaasha loo abuuro jawii iyo xalaad haboon oo waalidku ku gudanayo kaalinta kaga aadan ku bar'baarinta iyo dhaxalsiinta caruurta dhaqanka suuban ee bulshada.

Kh. waalidka/koriiyayaasha si ay caruurta ay ugu fidiyan tageerada iyo daryeelka lama huraanka ah waa in wacyigalin iyo fahan buuxa laga siiyo ilaalinta iyo badbaadada, barnaamijka kala koriinta qoyska, qaababka iyo khibraadaha wanagaasan ee ku sabsan bubarbaarinta caruurta;

d. madaama heerka waxbarasho ee waalidku ama koriiyuhu ay door weyn ku leedahay koriinka iyo barbaarinta suuban ee caruurta siiba waalidka ama koriyaha ku dhaqan meelaha miyiga waa in la abuuro xalaadaha ku haboon ee lagu gaadhsiin karo ama ay ku heli karaan waxabarashada dadka waa weyn;

### 3.3. Caruurta Iyo Caafimaadka

A. waa in la qaado talaabo kasta oo lama huraan u ah dhimista dhimashada ilamaha yar iyo caruurta da'doodu ka hooseeyso shanta sano;

B. Gaadhsiinta adeegyada lama huraanka u ah hooyada uurka leh si caruurtu u heesho nafaaqo ku filaan iyo tixgalin daweeyn islamarkaana loo dhiso awooda difaaca jidhka ee laga bilaabo xilliga uurka iyo uurka kadibba;

C. Hirgalinta talaabo kasta oo lama huraanka u ah xaqiijinta helitaanka nafaaqo ku haboon koriitaanka caafimaadka qaba ee maskaxeed iyo jidheed ee caruurta;

D. Xaqiijinta u sinaanta helitaanka adeegyada daaweynta iyo talaalka ee caruurta goobaha miyiga iyo magaalooyinka

E. kor u qadiida adeegyada caafimaad ee lagu xakamaynayo isku gudbinta cudurka HIV/AIDHISKA ee hooyada iyo ilmaha;

F. xaqiijinta in caruurta la nool cudurka HIV/AIDS la gaadhsiiyay oo ay helan daawada loo yaqaano Anti-Retroviral Treatment (ART) iyo daryeelka iyo xanaanada iyo takuleeynta lagama maarmaanka u ah iska ilaalinta iyo ka badbaadinta u nuglaanta dhibaatooyinka caafimaad daro iyo jaahawareerka maskaxeed;

G. Sahlida xalaadaha ku haboon dhismaha iyo balaadhinta adeegyada biyaha nadiifta ah, masquulaha, iyo qashiin quubka si ay gacan uga geeystaan in caruurtu ilaaliyan islamarkaana sugan nadafada iyi saxada shakhsi iyo degaanba;

H. Dabargoynta cadooyinka xun ee waxyeelada iyo sameeynta taaban ku leh koriinka jidheed, maskaxeed, damiir iyo bulsho ee caruurta;

I. Hirgalinta iyo jaheeynta xalaadaha munaasibka u ah caruurta si ay ugu baraarugsanadaan, helitaanka macluumaad, la talineed iyo adeegyada kale ee la halmaala caafimaadka taranka ee caruurta;

## 3.4 Caruurta Iyo Waxbarashada

A. Suurtogalinta bi'ad ku haboon kor u qadiida heer daboolka, tayada, cadaalada iyo midhadhaalnimada waxbarashada goobaha barbaarinta caruurta iyo xaqiijinta in geediga waxbarashada barbaarinta caruurta loo hirgaliyay hab wafaaqsan siyaasada daryeelka waxbarashada caadiga ka hor iyo siyaasada qaran ee waxbarashada;

B. Waa in waxbarashada dugsiyada barbaarinta caruurta lagu daro xirfada qaabka ugu fiican ee xanaaneynta caruurta iyo horumaarinta dabeecada iyo dhaqanka caruurta;

C. In la Taabogaliyo jawii munaasib ku ah geediga horumaarinta iyo helitaanka waxbarashada hoose iyo waxbarashada dugsiyada sareba laga dhigo waxbarasho la awoodo, tayo leh, cadaali ah oo midhodhaal ah;

D. suuragalinta jawiiga ku haboon ee caruurta goobaha bulshada xoolo-dhaqaatada ah ee u baahan loogu abuurayo helitaanka fursado gaara oo waxbarasho oo tayo leh ;

E. taabogalinta hanaan waxbarashada lagu lamaaneynayo adeegyo loogu talagalay dadka laxaadka la' ;

F. Taabogalinta nidaam mudnaan iyo tixgalin gaara lagu siinayo caruurta leh hiibo gaara iyo karti dheeriya;

G. Xaqiijinta xaqa dhamaan caruurta oo dhan u leeyihiin inay wax ku bartan luuqadooda ama af-hooyo.

H. Hoos u dhiga xadiga looxtuurka waxbarashada ee caruurta;

I. Caruurta aan ka qaybgali Karin dugsiyada waxbarashada caadiga ah loo abuurto islamarkaana la gaadhsiiyo adeegyada waxbarashada asaasiga ee dadban.

J. In la yareeyo farqada kala duwananshaha ee dhidiga iyo labka u dhexeeya ka qaybgalka waxbarashada

K. Suurtogalinta in dugsiyada waxbarashada ay kaalin mug leh ka gaystaan barbaarinta caruurta iyo horumaarinta guud ahaan arrimaha caruurta.

## 3,5. Caruurta, dhaqanka, sugaanta iyo madadaalada

b) In goobaha hoyga iyo goobaha kaleba caruurta suuragaliyo ama dhiso goobaha madaadalada, goobaha ciyaaraha iyo garoonada spoortiga oo ku haboon da'da iyo saxada caruurta

t) Waa in la suurtogaliyo dhismaha xaruumaha tababarada ee caruurta ka heli karan islamarkaana koroodhsan karan khiibraado cusub islamarkaana ay kobcinnayan haybaada ay u leeyihiin arrimaha suugaanta, Ciyaaraha spoortiga iyo sayniska iyo taknooloojiyada;

j) Suurtogalinta in caruurta loo abuuro adeegyada iyo xaruumaha barbaarinta iyo waxbarashada ee caruurta u fidiya adegyada kala duwan ee arrimaha bulshada;

x). taabogalinta goobaha masraxa, shaneemo, maktabada akhriiska, iyo xaruumaha hidaha iyo dhaqan oo ka kooban heerar iyo daraajooyin kala duwan oo caruurtu hadba da'dada ay yihiin kaga qaybgali karan kagana fa'iidaysan iyo sidoo kale, kuwa soo jirayna la sii xoojiyo;

kh). Waa in lagu baraarujiyo in madnuunuc tahay in goobaha madaadalada caruurta lagu soo bandhigo wax soo saarka warbaahinta ee aan sabaabo la xidhiidhka fayaqabka caruurta caruurta da'doodu ka hooseeyso 18 sano jir awgeed aan loo ogooleyn.

d). suurtogalinta in dalka gudihiisa iyo dibaadiisaba ay caruurtu ka qaybgasho islamarkaana khiibraad wadaag ku sameeyan hawlaha suugaanta eela xidhiidha caruurta;

r). suurtogalinta iyo dhirigalinta in warbaahinta dadaacan iyo mida qaab elektiroonikga ahba iyo sidoo kale, dabaacada iyo helitaanka buugagta caruurta loo diyaariyo qaab xambaarsan macluumaad dhamaystiraan oo muhiimaad iyo waxtar u leh barbaarinta suuban iyo dhismaha dadnimada iyo sharafta caruurta;

s). waa in qaybaha ay khuseeyso wada shaqeeyn iyo iskaashi adag lagala yeesho si caruurtii hadda ka hor dibaada loogu qaaday hab waafaqsan heeshiisyada koriinka caruurta ee dhexmaray wadaamada in la sii adkeeyo ku xidhnaanta iyo xidhiidhka ay la yeelanaya dalkooda islamarkaana ay ku barbaaran iyagoo garaanaya ama la socda dhaqankooda iyo haybta ama isiirka ay ka soo jeedan;

## 3.6. Caruurta ay Haysato Duruufo adag oo Nolooleed

A. Balaadhinta iyo dardargalinta korsashada maxaaliga ah,daryeelka kadis ah iyo barnaamijyada ku saleeysan mujtaamaca si caruurta agoonta ah iyo kuwa dayaacanba ugu barbaaran helitaanka kalgacaylka, daryeelka, tageerada iyo difaaca waalidka iyo sidoo kale in loo dhamaystiro baayihaooga asaasiga ah ;

B. Balaadhinta xaruumaha la talinta iyo wacyigalinta ee caruurta ay haysato duruufo adag oo nolooleed u fidiya adeegyada lama huraanka u ah islamarkaana xaqiijiya helitaanka iyo gaadhsiintooda;

C. Suurgalinta jawiiga ku haboon ee caruurta ay haysata xalaad adag oo u sahlaya inay fursad u helaan adeegyada bulsho iyo dhaqaale oo tayo leh islamarkaana wakhtiyaysan;

D. Hirgalinta jawiiga ku haboon midaynta iyo isdhexgalka qoyska ee caruurta ku jirta xaruumaha daryeelka iyo kuwa darbi-jiifka ah ee la jooga qoysaskooda, eheeladooda iyo bulshadaba qaab ku saleeysan tageerada iyo jaheeynta mujtaamaca, si ay ugu barbaaran barashada iyo la qabsiga hidaha iyo qayaamka mujtaamaca;

E. Abuurista xalaado u xagliinaya caruurta ku waxyeeloobay masiibooyinka daabiciga ah iyo kuwa dadku sabaaban iyo caruurta kale ee ay saameeysay abaaraha soo noq-noqda si ay u helaan takulayn, tageero iyo daryeelka lagama maar maanka ah;

F. Mideeynta iyo xidhiidhinta caruurta dadka dib u soo laabtay, caruurta ay qoysaskooda ay kala maqnaayeen iyo bulshada siyaabo kala duwan u kala maqnaa;

G. Soo jeedinta nidaamyo cusub oo lagu xaqiijinayo islamarkaana ilaalinta xuquuqaha bulsho iyo kuwa madaaniga ah ee caruurta xaqootiga ah;

H. Xaqiijinta in caruurta laxaadka la' ay fursad u helaan adeegyada lagama maarmaanka u ah bulshada iyo adeegyada kale ee lama huraanka ah;

I. Hirgalinta jawiiga munaasibka ku ah ka hortagga iyo xakamaynta ka qaybgalka caruurta ee ficillada waxyeelada ku ah koboca iyo horumarkooda jidheed iyo maskaxeedba, sida isku dhacyada hubeeysan, sameeynta maandooriyaha iyo ka ganacsiga daroogada iyo tahriibka iyo ficillada kale ee la midka ah ee sharci darada ah;

J. Taageero U fidinta agoonta iyo caruurta aan la noolan Karin waalidkooda adeegyada daryeelka bulshada, ku wareejinta koriiyaha maxaaliga ah iyo barnaamijyada dardargalinta xanaaneynta iyo nafaaqeeynta;

K. In tixgalin gaara la siiyo caruurta macaamilka la leh hay'addaha sharciga (caruurta ku waxyeeloobay gabood falka, kuwa maraag ahaan maxkamada

loo keeno, da'yarta dambiyada ku lugta leh, caruurta waalidkoodii ku kala maqanyihiin furiinka, caruurta waalidkoodu xidhan yahay iyo caruurta ku lugta leh dacwaadaha madaaniga ah;

L. In caruurta laga badbaadiyo ka qaybgalka ficillada ciqaabta ah islamarkaana loo fidiyo da'yarta ku kacda dambiyada in loo fidiyo adeegyo dib u dajin iyo dhexgalka bulshada;

M. Fuduudeynta xalaadaha caruurta lagula kacay gaboodfalada galmaada, xadgudubyada maskaxeed iyo damiirka ay ku helaayan adeegyo isku dhaafan oo sharci iyo dib u dajin ama dib u soo kabaasho;

N. Tageerida caruurta agoonta ah iyo kuwa u nuguul dayaacada iyadoo fursado maxaaliya oo daryeel oo lagu dardargalinayo khiibaaradaha wadaaniga ah iyo qiyaamka degaankas islamarkaana lagu xoojinayo alaadaha iyo nidaamyada ku haboon;

### 3.7. Caruurta Iyo Bi'ada

b. suurtgalinta iyo xaqiijinta in goobaha madadaalada iyo nasashada, hoyga, waxbarashada iyo xaruumaha hay'addaha caruurta u fidiya adeegyada arrimaha bulshadu ay yihiin kuwa soo jeedinaya islamarkaana ku haboon cartuuta;

t. meel-maarinta talabooyinka lagu xakamaynayo, hortagayo islamarkaana lagu tirtirayo goobaha lagu ibiyo laguna isticmaalo waxyaabaha waxyeelada xun leh, shishada iyo jaadka, iyo sidoo kale goobaha lagu dawaada filimada sharci darada ah ee lidka ku ah dhaqanka suuban, goobaha haweenka jidhkooda ka ganacsada , mukhmaaradaha, iwm ee sameeynta xun ku leh akhlaaqda iyo barbaarinta suuban ee caruurta, oo laga dabargoyo lagana foogeeyo goobaha waxbarashada, hoyga iyo meelaha degamaada ay degan yihiin hay'addaha caruurta u fidiya adeegyada lama huraanka u ah caruurta.

j. abuurista bi'ad ku haboon xalaada saxaada caruurta oo nadiifka ah wasaakhawga degaanka sida hawada, biyaha iyo wasaakhawga jabaaqda;

x. in caruurta laga tageero si loo kobciyo heerka ka qaybgalka ka hawlaha fa'iidasiga iyo daryeelka khayraadka daabiciga ah;

### 3.8. Xadgudbyada Caruurta, Ka Ganacsiga Caruurta, Ku Xoogsiga Caruurta Iyo Caadooyinka xun ee Waxyeelada leh

B. suuragalinta ba'd ku haboon ka hortaga iyo xakamaynta Xadgudbyada Caruurta, Ka Ganacsiga Caruurta, Ku Xoogsiga Caruurta Iyo Caadooyinka xun ee Waxyeelada leh.

t. waa in la baadhiyo lana xoojiyo ba'da fiican oo caruurta lagula kacay xadgudub iyo gaboodfalo ka dhan ah ay ka heli karan adeegyo dib u dajin iyo soo kaabasho iyo sidoo kale, dardargalinta iyo adkaynta fadhiyada dhegaysiaga arrimaha caruurta oo ku haboon xalaada caruurta.

j. waxaa in da'yarta shaqo doonka ah loo abuuro jawii fiican oo shaqo si ay uga badbaadan loogana ilaaliyo ku xoogsiga iyo ka fa'iidaysiga xooga caruurta iyo xalaada shaqo ee waxyeelada u leh caruurta.

## Qaybta Afraad

## 4. Xeeladaha Hirgalinta Siyaasada

### 4.1. ku lamaaneynta arrimaha caruurta

b). Suurtogalinta in dhamaan shuruucda, siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaaricaha oo dhan lagu lamaaneyo arrimaha caruurta;

t). Suurtogalinta in dhamaan hawlaha iyo shaqooyinka qaybaha gaarka loo leeyahay iyo hay'addaha aan dawliga ahaynba hanaan munaasib ah loogu lamaaneyo arrimaha caruurta;

j). Xaqiijinta in hay'addaha ay khuseeyso ilaalinta iyo ixtiraamka xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta ay ku lamaaneyeen xilka iyo wajibaadyada shaqo ee saran islamarkaana ay meel-maariyeen;

### 4.2. Taabogalinta Barnaamijyo Wacyigalin Iyo Abaabul

b). iyadoo la meel-maarinayo Barnaamijyo balaadhan oo Wacyigalin Iyo Abaabul oo horseedi kara dardargalinta iyo faafinta qiyaamka iyo hidaha fiican ee ay haystaan ama amiinsan yihin majtaamacyada ku dhaqan deegaankasta waa in la suurtogaliyo hanaanka ku haboon ee bulshada dareen lahaansho ku taabogalinayan hawlaha takuleeynta iyo daryeelka caruurta;

t). waa in wacyigalin iyo baraarug ku aadan shuruucda, heeshiisyadaha iyo siyaasadaha heer calaami, qaraadeed, qaran ee ku saabsan xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta loo abuuro qoyska, bulshada, hay'addaha dawladda, hay'addaha aan dawliga ahayn iyo hay'addaha kale ee ay khuseeyso;

j). Taabogalinta hawlo wacyigalin oo horseedi kara xakamaynta iyo dabargoynta aragtiyaha dhaqamiga ah, ficilada, xadgudubyada iyo ku xoogsiga waxyeelada xun ku leh koriinka caafimaadka qaba iyo barbaarinta suuban ee caruurta;

x). Iyadoo la agaasimayo munaasibadaha ciidaha iyo xaflaado kala duwan ee caruurta in la abuuro abaabul balaaadhan oo bulshada lagu jeedinayo si ay arrimaha caruurta ay ahmiyad u siiyan;

kh). Dulucda barnaamijyada laga baahiyo warbaahinta kala duwan waa in ay noqdaan kuwo mudnaan iyo ahmiyad siinaya barbaarinta suuban iyo dhismaha sharfta iyo dadnimada caruurta, in aan markasta oo la soo saarayo filimaanta, xayeeysiisyada iyo wax soo saarka hal abuurka kala duwan ee sameeynta ku yeelanaya barbaarinta fiican ee caruurta si fiican looga ilaaliyo in ayna ka qaybqadaan.

d). Taabogalinta hawlo wacyigalin iyo abaabul oo horseedi karta in dhamaan caruurtu isla marka ay dhashan la diiwangaliyo sidoo kale, kuwa aan la diiwaangalin lagu dhirigaliyo si loo diiwaangaliyo;

### 4.3. Dhismaha Iskaashi, Isku Xidhnaan iyo Istaageersi

b). abuuris iyo adkaynta xidhiidh iyo wada shaqeeyn adag oo dhexmarta laamaha dawladda, xaruumaha diimaha, xaruumaha uruurada bulshada iyo hay'addaha aan dawliga ahayn;

t. suurtogalinta sidii heer qaran, deegaan iyo qaab-dhismeedyada hooseeba looga asaasi lahaa islamarkaana loo xoojin laaha iskaashiyo iyo isbaahaysiyo ka shaqeeya xaqiijinta xuquuqaha iyo fayqabka caruurta;

j. abuurista iyo adkaynta istageersi qaran, qaraadeed iyo mid calaami ahba oo ku aadan arrimaha caruurta;

x. qaab-dhismeedyada arrimaha haweenka iyo caruurta wuxuu wajibaad ka saran yahay asaasida, isku-xidhka iyo xoojinta Iskaashi, Isku Xidhnaan iyo Istaageersi**.**

### 4.4. Kor u qadiida ka qaybgalka caruurta

b. waxaa la dajin lana dhaqangalin istiraatijiyado horseedi kara Kor u qadiida ka qaybgalka caruurta;

t. taageero iyo dhirigalin u horseedi karta caruurta karti iyo hal abuur gaara lagu maneeystay si ay u horumaariyan islamarkaana kobciyan kartida iyo xirfadooda,

j. waxaa la suurtogalin hanaanka ku haboon ee caruurta ka qaybgal fir-fircoon ugu yeelan lahayd arrimaha iyagaa khuseeya ee heer qoys, mujtaamac iyo kuwa ay dawladdu soo saarto;

x. waxaa tageero laga geeysan sidii dhamaan heerarka iyo jaranjarooyinka kala duwan looga asaasi lahaa loona xoojin laha qaab-dhismeedyada caruurta;

kh. Caruurtu si ay ka qaybgal ugu yeeshan barnaamijyada fanka, ciyaarahaiyo madaadaladaba waxaa la suuragalin balaadhinta iyo adkaynta goobaha dhaqanka iyo murtida iyo madadaalada;

d. waxaa la dardargalin hanaanka munaasibka ku ah ee caruurtu ku heli karaan macluumaad iyo qoraalo wakhtiga la socda oo dhisaya dadnimadooda iyo ka qaybgalkoodaba islamarkaana waxaa caruurta lagu dhirigalin inay baahiyan ama gudbiyan macluumaadka waxtarka leh ee ay hayaan;

## 4.5. Kor U Qadiida Ka Qaybgalka Qaab-Dhismeedyada Mujtaamaca

A. Ku dhirigalinta Qaab-Dhismeedyada Mujtaamaca inay tixgalin gaara siiyan guud ahaan horumarka iyo barbaarinta caruurta iyo sidoo kale, takulaynta agoonta iyo caruurta dayaacan si ay ugu barbaaran dhaqanka, hidaha, caadada iyo haybaada bulshada ku dhaqan degaanada ay ku dhasheen;

B. Dhirigalinta asaasida iyo balaadhinta qaab-dhismeedyada ku saleeysan bulshada ee ilaalinta xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta oo ku qootoma ka go'naanshaha iyo hindiisaha xubnaha mujtaamaca;

C. Suuragalinta xalaado u xaaglinaya isku xidhka iyo wadaaga qiyaamka iyo hidaha suuban iyo xeerarka bulshada ee la xidhiidha ilaalinta xquuqaha iyo fayaqabka caruurta;

D. U abuurista mujtaamaca jawiiga ku haboon ee ay kula dagaalami karan cadooyinka xun ee waxyeelada leh ee sameeynta iyo raadka xun ku leh horumarka iyo koriinka fiican ee caruurta;l

E. Ku Dhirigalinta mujtaamaca ka qaybgalka dadaalada si taar-tiib ah ay iaskood ugu asaasayan goobaha madaadalada iyo garoonada ciyaaraha ee lama huraanka u ah horumaarinta iyo barbaarinta caafimaadka qaba ee caruurta;

### 4.6. Adkaynta Iyo Xoojinta Qoyska

b). waxaa qaab hay'adeed loo taabogalin barnaamijyo iyo adeegyo kala duwan si ayna u daabcin islamarkaana u duubin xidhiidhka u dheexeeya qoyska oo qoysku hanaan munaasib ah uga soo baxo kaalinta masuuliyada ka saran ku barbaarinta caruurta hanaan dhamaystiraan oo sugaya sharafta ilmaha.

t). taabogalinta nidaam dhirigalinaya in qoysku ay iskood iyo ka go'naanshaooda ku tageeran caruurta ay haysta duruufo adag oo noolooleed;

j). waxaa la dajin barnaamijyo iyo adeegyo waxtar u leh islamarkaana looga fa'iidaynayo qoysaska ay caruurtu hogaamiso ama masuulka ka tahay si loo xakamayo loona dhimo dhibaatooyinkooda dhaqaale iyo bulsho ee ku gadaaman;

x). waxaa la taabogalin islamarkaana la adkayn barnaamijyo kala duwan oo lagu abuurayo illo dhaqaale oo kala duwan oo lagu tageerayo qoysaska si loo adkeeyo islamarkaana looga dhabeeyo loona xaqiijiyo daboolida iyo waxka qabashada xuquuqaha arrimaha bulsho iyo dhaqaale ee caruurta oo Caafimaadka iyo waxbarashadu ka mid yihiin;

Kh. Waxaa suuragalin in waalidku ama koriyayaashu ay helaan waxbarasho ku saabsan hanaanka suuban ee barbaarinta caruurta;

### 4.7. Taabogalinta Daraasado iyo Cilmi-Baadhis

b. hay'addaha dawladda iyo xaruumaha bulshada rayidka ah ee ka jira heerarka kala duwan kuna hawlan ama shaqeeya hawlo ku aadan ilaalinta iyo sugida xuquuaha iyo fayaqabka caruurta waxaa lagu dhirigalinta hirgalinta iyo meelmaarinta daraasado iyo Cilmi-Baadhis xal u noqon kara ama xallin kara dhibaatooyinka iyo duruufaha haysta caruurta;

t. waxay meel-maarin Daraasado iyo Cilmi-Baadhis lagu ogaanayo islamarkaana si cad u tilmaamaya sabaabaha, cawaaqibka iyo xalka dhibaatooyinka ay caruurtu wajaahdo;

j. waxaa la suuragalin in Daraasadka iyo Cilmi-Baadhista lagu sameeynayo qaybaha shaqo ee la xidhiidha arrimaha caruurta loo fuliyo hanaan ay ku dheehan tahay anshax xirfadeed oo wax ku ool u ah xaqiijinta xuquuqaha iyo fayqabka caruurta;

x. Xaruumaha sare ee waxbarashada iyo kuwa kale ee daraasadka iyo cilmi-baadhista waxaa lagu dhirigalin sidii ay u taabogalin lahayeen daraasadyo ku aadan arrimaha caruurta, islamarkaana in ay natiijada daraasadka iyo cilmi-baadhista gaadhsiiyan u baahiyan ka fa'iidaystayaasha.

### 4.8. Fulinta Dib U Habeeyn Sharci

Hab wafaaqsan daraasad loogu kuurgalayo goddaloolooyinka ka jira shauruucda ku saabsan ilaalinta xuquuqaha iyo fayqabka caruurta ayaa waxaa lagu sameeyn dib u habeeyn, gaar ahaan inta dib u habeeynta xeerka qoyska la darso ayaa dalka oo dhan laga dhaqangalin.

### 4.9. Taabogalinta Nidaamka Xog Wadaaga

b). Wasaarada arrimaha haweenka iyo caruurtu waxay taabogalin nidaamka uruurinta xogaha caruurta oo heer qaran ah kaas oo horseedaya uruurinta iyo isku dubaaridka maclaamuudka la xidhiidha caruurta ee heer federal, deegaan iyo qaab-dhismeedka ka hooseeyaba.

t). waxaa la suurtogalin baahinta iyo gaadhsiinta macluumaadyada laga soo uruuriyay islamarkaana la isku duubariday arrimaha caruurta;

### 4.10. Kobcinta Awooda Fulineed

b. iaydoo loo kuurgalayo islamarkaana la ogaanayo khiibraadaha fiican ee la xidhiidha arrimaha caruurta ee ka jira heerarka kala duwan ayaa la suurtogalin dardargalintooda iyo ku dhaqankooda;

t. ai siyaasadani u meel-maarto waxaa tageero kobcinta awoodeed ee ku haboon loo fidin hay'addaha, dawliga ah, kuwa aan dawliga ahayn, xaruumaha diimaha, iyo mujtaamaca ee heerarka kala duwan oo dhan ku hawlan arrimaha caruurta;

j. si loo sugo xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta islamarkaana meesha looga saaro aragtida khaldaan ee bulshadu ka amiinsan tahay caruurta waxaa laga shaqeeyn sidii loo soo saari laha xirfadlayaal ku takhaakhusay cilmiga kala duwan ee la halmaala arrimaha caruurta;

## 4.11. Taabogalinta Nidaamka Uruurinta Iyo Abaabulka Khayraadka

b. si siyaasada loogu taabogaliyo hanaan midhodhaal ah oo la taaban karo dawlaaddu waxay isku xidhi islamarkaana abuuri jawiiga ku haboon ee shacabka, xaruumaha diimaha, uruurada rayidka ah iyo qaab-dhismeedyada bulshada iyo sidoo kale, hay'addaha maxaaliga ah si ay u kordhiyaan islamarkaana u liibinlaabi karaan tageero maaliyadeed iyo maalba.

t. waxaa la abuuri marxalaadaha ku haboon ee suurtogalin kara in bulshada iskeed isku abaabulaysa islamarkaana iyadoo adeegsaneysa qaab-dhismeedyada dhaqamiga ah iyo xeerarka bulsho ay isla iyagoo iskaga uruurin lahayeen taageero maaliyadeed iyo maalba islamarkaana tageero waara ugu fidin lahaayen si loo xaqiijiyo islamarkaana sugo xuquuqaha iyo fayqabka caruurta gaar ahaan kuwa agoonta ah ee u nuguul ama ay asiibtay dhibaatooyin iyo duruufo kala duwan;

j. waxaa la abuuri jawiiga ku haboon ee qaybaha gaarka loo leeyahay barbaarinta iyo kobcinta akhlaaqda suuban ee caruurta intay ku tabaarucan tageero farsamo, maaliyadeed iyo maalba ay gudaanayan wajibaadka muwaadinnimo ee ka saran;

## 4. 12. Asaasida Iyo adkaynta Qaab-Dhismeedyada

b. waxaa la asaasi gole qaran oo u qaabilsan dabagalka hirgalinta siyaasada oo ay xubno ka yihiin wakiilada xafiisyada kala duwan ee arrintu khuseeyso ee

heer federal iyo deegaanba, taasi oo loo dhaadhicin doono lana gaadhsiin doono ilaa qaab-dhismeedka iyo jaran-jaraada maamul ee hoose;

t. waxaa la xoojin doona qaab-dhismeedyada heer federal, deegaan, gobol iyo degmo ee loo asaasay dabagalka arrimaha caruurta;

j. hay'addaha dawladda ee ka jira heer federal ilaa qaab-dhismeedka jaran-jaarada maamul ee ugu hooseeysa waxay yeelan wax gaara oo u qaabilsan dabagalka iyo la socodka arrimaha Caruurta;

## Qaybta Shanaad

## 5. Wajibaadka Iyo Doorka Kaga Aadan Laamaha Ay Khuseeyso Ilaalinta Xuquuqaha Iyo Fayaqabka Caruurta

Inkasta oo ixtiraamka iyo ilaalinta xuquuqaha iyo fayqabka caruurta iyo dhaqabgalinta siyaasadani tahay mid u baahan sidoo kale, hirgalinta baahiyaha caruurtu tahay mid u baahan iskaashiga iyo wadashaqeeynta hay'addaha oo dhan ayaa haddana waxaa hoos ku qeexan Wajibaadka Iyo Doorka ugu waa weyn ee hay'addaha dawliga iyo kuwa bahwadaagta ah kaga aadan hirgalinta arrintani.

### 5. 1. Hay'addaha Dawliga

b). dhamaan hay'addaha dawligu iyadoo ka duulaya xilka iyo wajibaadka shaqo ee loo igmaday, ayay door lama huraan ah ku leeyihiin hirgalinta siyaasadani, hogaaminta, hirgalinta, iskudubaaridka iyo habeeynta, isku xidhka iyo kobcinta awooda fulineed, miisaaniyad u qoondeeynta iyo sidoo kale, uruurinta, habeeynta iyo baahinta xogaha caruurta la xidhiidha.

t). Wasaarada arrimaha haweenka iyo caruurta wuxuu wajibaadka ka saran yahay dabagalka iyo iskudubaaridka hanaanka hirgalinta siyaasadani, sidoo kalena, wuxuu hay'addaha ay khuiseeyso ka uruurin, iskuna dubaaridii macluumaadyada la xidhiidha arrimaha caruurta islamarkaana warbixin joogto ah u gudbin laamaha iyo qaybaha ay khuseeyso.

j). waxay shaqaalahooda u abuuri xalaad ku haboon gaadhiisnta caruurta tageero iyo daryeel ay ku sugayan xuquuqaha iyo fayqabka caruurta.

### 5.2. Qaybaha gaarka loo leeyahay

b). dajinta iyo taabogalinta barnaamijyo kala duwan oo lagu suurtogalinayo ilaalinta iyo ixtiraamka Ilaalinta Xuquuqaha Iyo Fayaqabka Caruurta;

t). si loo xaqiijiyo ilaalinta xuquuqaha iyo fayaqabka caruurta waa in tabaaruucad dhaqaale la helaa;

j). waa in loo hogaansamo islamarkaana si haboon loo dhaqangaliyo bayaanka shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha, shuruucda u yaala uruurka shaqaalaha ee aduunka iyo sidoo kale, shuruucda kale ee hee qaran iyo kuwa calaamiga ee la xidhiidha Ilaalinta Xuquuqaha Iyo Fayaqabka Caruurta;

x). waxay shaqaalahooda u abuuri xalaad ku haboon gaadhiisnta caruurta tageero iyo daryeel ay ku sugayan xuquuqaha iyo fayqabka caruurta.

Kh). Waa in laga foogado bixinta adeegyada iyo barista adeegyada sharci ahaan laga madnuucay caruurta islamarkaana sameeynta taban ku leh barbaarinta iyo koriinka suuban ee caruurta;

d). ka qaybgalka dhamaan hawlgalada ku wajaahan Ilaalinta Xuquuqaha Iyo Fayaqabka Caruurta;

r). in la dhawro islamarkaana la dhaqangaliyo shruucda iyo axdiga/xeerarka ku soo baxay xakamaynta wasakhoowga bi'ada si loo suurtogaliyo taabogalinta xaqa caruurtu u leedahay si ay caruurtu in ugu nooladan bi'ad saxo caafimaad leh;

### 5.3. Qaab-dhismeedyada mujtaamaca

b). caruurta ka tirsan mujtaamacu si ay ugu barbaaran qayaam iyo akhlaaq suuban ee waa in loo abuuro goobaha madadaalada iyo xalaadaha kale ee lagama maarmaanka u ah;

t). caruurta ay haysato duruufo adag oo nolooleed si ay ugu barbaaran hidaha, dhaqanka iyo luuqadoodaba waa in loo fidiya takulayn iyo gargaar joogto ah;

j). waa in la qaado talaabooyin caruurta lagaga badbaadinayo noockasta oo gabood fal iyo ku xoogsiga qasabka ah iyo sidoo kale, kuwa ay loo gaadhay xadudubyadu waa in loo sameeyo/abuuro adeegyo dib u dajin iyo dib u kabaasho ku saleeysan xalaada gaarka ah ee degaankas;

x). qaab-dhismeedyada kala duwan ee bulshadu waa inay iskood u dajiyan islamarkaana u dhaqangaliyan barnaamijiyo kala duwan oo waxtar u leh koriinka iyo barbarian suuban ee caruurta;

kh). In cidkasta oo ku kacda ficilo ka dhan ah koriinka iyo barbaarinta suuban ee dhalaanka waa in iyadoo laga duulayo dhaqanka iyo xeerarka bulshada aggas la waaniyo loona aqli-celiyo islamarkaana talaabada ku haboon laga qaado; sidoo kalena lala socodsiiyo qaybaha ay khuseeyso, dabagalna lagu sameeyo hirgalinteeda;

### 5.4. Qoyska

b). in caruurta ka tirsan qoyska hanaan waafiya loogu dhamaaystiro baahiyahooda agab iyo kuwa la xidhiidha nafsiyada si ay u noqdaan kuwa ku guulaysta waxbarashadooda iyo caafimaadkoodaba;

t). in caruurta ka tirsan qoyska laga difaaco si ayna u soo gaadhin gabood fal jireed iyo nafsi islamarkaana caruurta lagula kacay gabood falada lagu gacansiiyo si ay u helaan adeegyada dib u dajin ee lagama maarmaanka u ah;

j). in caruurta ka tirsan qoyska lagu barbaarayo dhaqanka, hidaha iyo qiyaamka suuban ee bulshada islamarkaana qoysku ama waalidku kiriinka fiican ee caruurta u hormuud ka noqdo islamarkaana wajibaadka ka saran u guuto;

x). inay hirgalinta siyaasada ka gaystaan doorka ka qaybgal ee kaga aadan;

### 5.5. Hay'addaha Diimaha

b). Hay'addaha Diimuhu waxay ku hawlgali hanaan ay barnaamijyada horumaarineed ee ay fulinayaan ay ku lamaaneyan islamarkaana ay ahmiyad ku siiyan arrimaha caruurta;

t). caruurtu madaama ay xaq u leeyihiin xooriyada aragtida, damiirka iyo diimeedba dhamaan xaruumaha diimuhu tageerada iyo daryeelka ay caruurta u fidinayan waa in ayna ku saleeysan noockasta oo faquuq iyo takoor;

j). xaruumaha diimuhu waa in ay bixiyan adeegyada lama huraanka u ah kobocinta koriinka jireed, maskaxeed, damiir, caqiido iyo horumarka arrimaha bulshada;

### 5. 6. Uruurada Iyo Hay'addaha Samafalka

b). waa in la abuuro xalaada ku habboon ee caruurta ku nool marxalaad qalaafsan si waara looga samaato bixinayo islamarkaana ay uga soo kabaanayan dhibaatada ku tirsanaanta;

t). caruurta ku nool marxalaad qalaafsan si ay ugu barbaaran hanaan ay ku dheehan tahay ciisi iyo sharaf waa in loo fidiyo adeegyo asaasiya oo heerkoodu sugan yahay;

j) Dhamaan adeegyada la siinayo caruurtu waa in ay noqdaan kuwo danaha iyo fayaqabka caruurta mudnaan siinaya islamarkaana ka madaxbanaan hanaan kasta oo shaqo oo eex iyo faquuq huwaan;

x) Waa in la abuuro jawiga ku haboon ka qaybgalka caruurta ee laga bilaabo geediga diyaarinta iyo hirgalinta baraanmijyada iyo mashaariicaha;

kh) in iyadoo looga duulayo shuruucda iyo xeerarka dalka bixinta adeegyada asaasiga ah iyo gacansiinta dhaqangalinta siyaasada;

### 5. 7. Bahwadaagta Qaraadeed Iyo Calaamiga ee Horumarinta

Hawlgalada kala duwan ee ku aadan sidii loogu gudbi lahaa in siyaasada qaran ee caruurta ficil dhab ah loogu bdedlo waa in dawladda wada shaqeeyn iyo iskaashi ba lala wadaago;

### 5.8. Doorka Caruurta

Hirgalinta siyaasada caruurtu waxay ku yeelan doorka hoos ku qeexan:

A. Inay ka shaqeeyan midnimada iyo wada jirka qoyska, tixgalinta iyo ixtiraamka xubnaha qoyska, dadka ka waaweyn/waayeelka, iyo tabeero-siinta iyo gacansiinta dadkas xilliga ay u baahan yihiin;

B. Adkaeeynta iyo sugida iskaashiga iyo midnimada qaran iyo bulsho islamarkaana in xuquuqahooda ay hanaan abaabulan uga fa'iidaystaan una adeegsadan;

C. Inay mujtaamaca ay ka tirsan yihiin ugu tabaarucan uguna adeegan awoodooda maskaxeed iyo jireed;

D. Iyagoo xubnaha kale ee mujtaamaca ay ka tirsan yihiin la wadaagaya hanaan isqadaarin, wada tashi iyo Isfahan islamarkaana xidhiidhka dhexmaraya ama ay sameeynayan ku sii xoojinaya islamarkaana ilaalinaya qiyaamka iyo aqiidooyinka fiican inay kaalin ka gaystaan dhismaha damiirka iyo ayaaha bulshada.

E. U kuurgalida iyo la socodsiinta qaybaha ay khuseeyso arrimaha/sabaabaha u horseedi kara dhiibaatooyin iyo waxyeelo kala duwan.

F. In ay g/socodka hirgalinta iyo qiimaynta siyaasada ay qaybgal manco leh ay ka geeystaan;

.

# Qaybta Lixaad

## 6. Nidaamka Dabagalka Iyo Qiimaynta Siyaasaada

Si ay wax uga taro Marka laga eego hirgalinta siyaasada islamarkaana in natiijadiisa lagu cabiiro dhamaan heerkasta iyo sidoo kale loogu lamaaneyo hadba arrimaha cusub ee u waato koboca horumar ee lagu jiro iyo hagaajinta iyo dib u habeeynta siyaasada waxaa la taabogalin nidaam Dabagal Iyo Qiimayn oo xambaarsan arrimaha laf-dhabarta u ah ee hoos ku cad**;**

b). dhamaan hawlaha ay hay'addkasta qabanayso laga bilaabo wajiga qorshaynta ilaa hirgalinta waxaa loo diyaarin halbeegyo lagu cabiiro waxqabadka;

t).waxaa la diyaarinta stiraatijiyada iyo qorshaha fulineed ee siyaasada, wasaarada arrimaha Haweenka iyo caruurta iyo Xafiiska arrimaha Haweenka iyo caruurta ee Deegaanka ay khuseeysona waxay masuuliyadii ka saran tahay dabagalka iyo korjoogteynta hirgalinta siyaasada;

j). sanadkiiba hal mar waxaa la agaasimi shirweyne/madal sanadleh ah oo lagu qiimeeyo islamarkaana gorfeeyo hirgalinta siyaasada oo ay qayb ka yihiin ama kulmiinaya dhamaan hay'addaha fulinta;

x). waxaa la abuuri nidaam qaran oo lagu hago hanaanka dabagalka, qiimaynta, xog uruurinta iyo isku dubaaridka iyo ka warbixinta oo wasaarada wasaarada arrimaha Haweenka iyo caruurtu dusha ka hogaamiso;